

XEERKA N. 175 rep.

MAAMULKA WALAAYADA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA

MAAREEYE

MARKUU ARKAY sharciga lambar 4 soona baxay nobembar 1951, n. 1031, kaas oo ansaxinaya heshiiska ilaalinta dhulka Soomaaliya ee hoos yimaada Maamulka Walaayada Talyaaniga oo siiyanaya awood fulineed oo buuxda;

WAXAA LA TIXGELIYEY baahida loo qabo in la asaaso dugsi bilow ah ee xirfadda nooca ganacsiga;

MARKI UU DHAGEYStay Golaha Dhexe ee Dugsiga;

WUXUU XEERAYNAYAA:

Qod. 1.

Dugsi xirfadeed ganacsi oo Talyaani ah ayaa laga sameeyay Muqdisho.

Qod. 2.

Dugsiyada horay loo soo sheegay, waxa lagu dhaqaa sharciyada dugsiyada Talyaaniga ee la midka ah.

Qod. 3.

Kharashaadka la xiriira socodsiinta Dugsiga waxaa la saariyaa qodobka 67 iyo mushaarka aan caadiga aheyn ee macallimiinta oo la saarayo qodobka 67 mar labaad miisaaniyadda sanad maaliyadeed 1952-1953 iyo qodobbada u dhigmaya ee xisaab maaliyadeedka sannadaha xiga.

Muqdisho, 27 sabteembar 1952.

MAAREEYE
Canino

Arkay diiwaangelinta n. 838 ee R. D.
30 Oktoobar 1952.
